



# **Ardayda Waxbarashada Gaarka ahi waqtii wanaagsan ayay ku soo qaateen Maalintii Booqashada ay u baxeen loogu magac daray Superhero Field Day**

Ugu yaraan 350 arday oo ka tirsan ardayda Waxbarashada Gaarka ee dhammaan dugsiyada degmada, kana kala socda heerka xannaanada bilowga ah ilaa fasalada sideedaad, ayayaa waxa ay ka soo qeybgaleen Maalintii ay safarka gaaban bannaanka ugu baxayeen ee loogu magac daray Superhero Field Day, halkaasi oo ay ku tageen Dugsiga Sarre ee Jefferson garoonkiisa. Ardayda waxa ay wareejiyeen waxyaabo dhawac sameeya 16 goobood, sida waxyaabo ay biyo ku jiran ee la yiraa Aquaman Relay iyo mid kale oo wax burburinaya ee Hulk Smash!

Munaasabada waxaa isku soo dubariday Macalimiinta Waxbarashada Jirka ee La Qabatimo Dugsiyada Dadweynaha Portland, waxa ay qeyb ka yihiin Kooxda Horumarinta Xirfadaha Muruqyada Laga Qabto ee PPS. Macalimiinta Jimicsiga Jirka ee La Qabatimo waxa ay u addeegaan dhammaan ardayda wax ka barata Dugsiyada Degmada ee u baahan qabatinka waxyaabaha la qabanayo iyo sidii loogu khafiifin lahaa manhajkooda waxbarasho iyo waliba qalabka Jimcisiga Jirka (PE). Waxa ay siiyan casharo iyaga si gaar ah loogu talogalay sidii ay xubnahooda u isticmaali lahaayeen iyo qalabyada ee ay u baahan yihiin in lagu ilaaliyo caruurta leh baahida gaarka ah.

“Mar labaad waa soo noqonay!” ayey tiri Sarah Spella, oo ah macalimad dhigta Jimicsiga Jirka La Qabatimo (PE) taasi oo ahayd xiriiriyyaha maalintaasi ardayda socdaalka gaaban ku baxeen loona bixiyey Superhero Field Day. “Iyada oo ayna jirin maalin socdaal gaaban oo gaar ah lixdii sanno ka dib, waxa aan qorsheyneynaa munaasabada sanadka soo socda sidii ayu noqon lahayd mid guuleysata. La socdo!”